# U sii gudbid: bilow wanaagsan oo dugsi

**Tusayaasha lagu caawimayo qoysaska si ay u dhameeyaan Caddaynta Ku-meelgaarka ah iyo Caddaynta Horumarka**

## Waa maxay sababta bilowga fiicani muhiim ugu yahay dugsiga?

Bilowga wanaagsan ee dugsiga wuxuu ka caawin karaa ilmahaaga inuu si fiican wax u barto oo uu dareemo farxad markuu ka wareegayo kindhada oo u wareegayo dugsiga iyo waxbarashadooda mustaqbalka. U gudubka wanaagsan wuxuu sidoo kale caawinayaa sii socoshada ilmahaaga koritaankiisa iyo waxbarashadiisa, iyadoo la dhisayo khibradiisa hadda iyo tii hore ee ilmahaaga si ay u caawiso iyaga si ay u dareemaan amaan, kalsooni iyo ku xirnaan. Bilowga wanaagsan ee dugsiga wuxuu sidoo kale caawinayaa iyaga inay noqdaan kuwa ka sii adkeysi badan.

## Waa maxay waxbarashada ku meel gaarka ah iyo caddaynta horumarku?

Adeegyada carruurnimada hore, adeegyada dugsiga, Daryeelka Saacadaha Dugsiga ka baxsan (OSHC) iyo qoysasku inay wada shaqeeyaan si ay taageeraan waxbarashada carruurta iyo fiyoqabka. Waxay wadaagan macluumaadka iyagoo isticmaalaya Qoraalka Horumarinta iyo Waxbarashada una sii gudbida (TLDS). Tan waxaa qoray adeega carruurnimada hore ee ilmo kasta isla markay dugsiga aadaan.

Macluumaadka saamiyada TLDS ee ku saabsan waxbarashada ilmahaaga, horumarka iyo fayoqabka u dhaxeysa dugsiyada iyo adeegyada carruurnimada hore. TLDS waxay bixisaa feker dhakhsa ah ee wuxuu xiiseeyo ilmahaagu, xirfadihiisa iyo awoodihiisa oo wuxuu ogaadaa talaabooyinka shakhsiyeed iyo barida ilmahaaga istiraatijiyo taageeraysa ilmahaaga.

TLDS wuxuu kaa caawin karaa adiga inaad fahamto oo aad ku taageerto ilmahaaga waxbarashadiisa isla markay dugsiga bilaabaan. Macluumaadka ku jira TLDS wuxuu ka caawiyaa macalimiinta Aasaaska hore si ay u ogaadaan ilmahaaga iyo inay qorsheeyaan barnaamijyada waxbarida ee ku haboon. Haddii ilmahaagu uu ku jiri doono OSHC, TLDS waxay ka caawineysaa qorshe wakhtigooda ay halkaas sidoo kale.

TLDS waxay haysaa waxoogaa faahfaahin shakhsiyeed oo ay ku jiraan ilmahaaga magaciisa, wakhtiga dhalashadiisa iyo sawirkiisa, iyo sdioo kale magacaaga iyo macluumaadka xiriirka. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inuu ka kooban yahay magaca iyo faahfaahinta xiriirka ee xirfadlayaasha kale ee carruurnimada hore ee taageeray ilmahaaga.

Wax ka geysashada TLDS-ga ilmahaaga waa mid ka mid ah u sii gudbida nashaadka dugsiga ee adiga iyo ilmahaagu aad ka qaybqaadan kartaan ka hor intaan dugsigu bilaaban.

## Sidee baan u helayaa TLDS ka ilmahayga?

Adeega carruurnimada hore ee ilmahaaga wuxuu ku siin doonaa xiriirka qalabka TLDS ee Online ka ah. TLDS ka Online ka ah waa sida ugu wanaagsan ee lagu dhammeystiro TLDS.

Haddii aadan isticmaali karin qalabka online ka ah, waxaad bedel ahaan weydiisan kartaa nuqul waraaqo ah.

## Qaybtee ayaan ka buuxiyaa TLDS?

*Qaybta 1* iyo *1.1* waxaa buuxinaya baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga.

*Qaybta 1.2* waxaa laga yaabaa inuu buuxiyo baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga haddii ilmahaagu uu leeyahay dib u dhac koritaan ama baahi gaar ah. Xirfadlayaasha kale ee caawinaya ilmahaaga ayaa sidoo kale laga yaabaa inay ku daraan qaybtan.

*Qaybta 2: Ilmaha* waxaa u buuxiyay ilmahaaga oo uu la jiro qof weyn oo ay yaqaanaan. Tani waxay noqon kartaa adiga, ama barahooda carruurnimada hore.

*Qaybta 3: Qoyska* adiga ayaa buuxinaya. Wax ku darkaagu waa muhiim. Qaybtaan waxay leedahay su'aalo kaa caawinaya inaad la wadaagto waxa ilmahaagu uu xiiseeyo, iyo sidoo kale fikradahaaga iyo rajooyinka ilmahaaga ee aad ka qabto dugsiga. Ka jawaabida su'aalahan waxay caawin karaan macalimiinta iyo shaqaalaha OSHC ( haddii ay khuseyso) inay ka jawaabaan oo ay fahmaan ilmahaaga, taas oo taageeri doonta waxbarashadooda iyo horumarkooda.

## Maxaa dhacaya ka dib marka la dhammeystiro TLDS?

Ka dib marka la dhammeystiro TLDS, barahaaga carruurnimada hore ayaa ku siin doona nuqul la dhammeystiray.

Barahaaga carruurnimada hore wuxuu sidoo kale la wadaagi doonaa TLDS ka dhammeystiray dugsiga ilmahaaga iyo adeega OSHC (haddii ay khuseyso).

Haddii aadan hubin dugsiga ilmahaagu uu dhigan doono, baraha carruurnimada hore ayaa ku siin doona nuqul labaad oo ah TLDS. Waxaad siin kartaa tan dugsiga markaad ka diiwaangelisid ilmahaaga.

Haddii aadan dhammeystirin *Qaybta 3aad: Qoyska*, baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga wuxuu la wadaagayaa qaybaha kale ee dhammeystiran dugsiga iyo adeega OSHC (haddii ay khuseyso) waxayna ku siin doonaan nuqulka waxa lala wadaagay.

Natiijo celinta iyo daraasada dugsiyadu waxay muujiyeen in wadaagida macluumaadkani uu taageerayo ugudbida lagu guuleysto ee dugsiga. Haddii aad doorbidi lahayd inaad la wadaagto TLDS dugsiga ilmahaaga, fadlan kala hadal baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga.

Macluumaadka amaanka ah ee haboon wuxuu caawinayaa xirfadlayaasha Victoria ee haboon inay yeeshaan macluumaadka iyo aqoonta loo baahan yahay si loo hubiyo amaanka iyo fayoqabka ilmaha.

Macluumaad intaas ka badan, booqo https://www.vic.gov.au/information-sharing-schemes-and-the-maram-framework

## Macluumaad intaas ka badan

Si aad u barato intaa wax ka sii badan, waxaad booqan kartaa www.vic.gov.au/transition-school-resources-families

Macluumaadkan waxaa sidoo kale lagu helayaa tiro luuqadaha bulshada ka mid ah isla linkigan xiriir: www.vic.gov.au/transition-school-resources-families